# Information om lugnande medicin vid tandbehandling

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

**v. 2012**

*Somaliska*

## Warbixinta daawadda dejinaysa walwalka marka ilkaha la daryeelayo

Daawadda (Midazolam) ayaa la siiya ugu dhowan 20 daqiiqo ka hor inta aan ilkaha daryeelkooda la bilaabin si loo dejiyo walwalka iyo cabsidda. Daawaddu waxay kale oo waxtaraysa in muruqyadda jirka ay dabcaan iyagoo laakiin raad ku yeelanaya in dheellitirka dhaqdhaqaaqa qofka wax iska bedelo, taaso muhiim ah in laga fekero daryeelka kadib. In qofku xusuusto daryeelkii ilkahana si caadi ah ma noqonayo sababta oo ah daawadda ayaa wax ka bedeleysa awoodda xusuusta qofka.

Carruurta badana waa ay murugeysan yihiin wakhtiga ama daryeelka ilkaha ka dib iyadoo xatta daawadda la siiyey. Sababtaa awgeed waa muhiim in carruurta la siiyo muuqaal fiican ee dhacdadda daryeelka ilkaha maddaama taasi ay tahay waxa carruurtu marka dambe xasuusanayan!

### Cunto qaadashadda

Cun cunno fudud 2 saac ka hor daryeelka ilkaha. (ha cunin cabitaanka banbeelmadda)

### Daryeelka ilkaha kadib

Waxtarka daawadda waxay jirka ku jiraysa muddo dhowr saacadood ah. Badanaa waxaa qofka loo oggol yahay in uu joogo qaybta daryeelka 1 saac ee daryeelka ilkaha ka dib.

### Dadka qaan gaarka ah

Gaadiid wadid waa ka **mamnuuc** muddo dhan 12 saacaddood ee daryeelka ilkaha kadib. Dadka qaan gaarka ah waa in ay la socdaan qof u wehelyeela marka ay ka baxayan qaybta daryeelka ee guriga aadayaan.

### Carruurta

Carruurta marka ay guriga aadayaan oo ku safrayaan baabuur waa in carruurta lagu fadhiisiya kursiga gaariga ama suunka badbaadada markaana uu qof weyn dhinac fadhiyaa. Waa in carruurta isha uu ku hayaa qof weyn maalinta oo dhan. Haddii carruurtu seexdaan waa in dhinac loo seexiyaa. Ku ciyaaridda guriga dibeddiisa, baaskiil wadidda iyo meel fuulidda waa in laga ilaasha.

*Haddii aad su'aalo qabto telefoon u dir:*

…………………………………………………………………………………………………………………………….